

7 Waxyaabood oo ay Tahay in laga Ogaado Maqnaanshaha Joogtada ah

Waa maxay maqnaanshaha joogtada ah?

Maqnaanshuhu waa cabbir inta maalmood ee arday ka maqnaado dugsiga sannadkii oo dhan. Ka maqnaanshaha 10% maalmaha dugsiga ayaa loo tixgeliyaa maqnaansho joogto ah.

Maxay muhiim u tahay imaanshaha dugsigu?

Cilmibaaris ayaa muujinaysa isku xirnaan xooggan oo u dhaxaysa imaanshaha dugsiga iyo waxqabadka ardayga. Marka boqolkiiba inta badan ee ardaydu si joogto ah u maqan yihiin, waxay saamayn ku yeelan kartaa ardayga maqan iyo sidoo kale ardayda fasalka.

Waa maxay sababta Maine ula socota maqnaanshaha joogtada ah?

Maine waxay u isticmaashaa maqnaanshaha joogtada ah qaab loo cabbiro horumarka ardayga ee dugsiga iyo inay caawiso go'aaminta halkii taageero loo baahan yahay dugsiyada Maine.

Maxay gobolada kale sameeyaan?

Maine waa mid ka mid ah 36 gobol oo u isticmaala maqnaanshaha joogtada ah, ama cabbirka imaanshaha ee la midka ah, cabbirista guusha ardayga iyo dugsiga.

Xaggee ay xogtu ka timaadaa?

Laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2016/2017, [xogta maqnaanshaha joogtada ah](#) waxaa looga soo ururiyaa dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadwaynaha si sannadle ah waxaana sii ururisa Waaxda Waxbarashada ee Maine.

Maxaa lagu tiriyaa maqnaansho?

Dhammaan maqnaanshaha waxaa lagu tiriyaa maqnaansho, xiitaa markaad dirto warqad aad ku codsanayso maqnaansho cudurdaar leh.

Sidee dugsiyada ay wax uga qabtaan maqnaanshaha joogtada ah?

Waaxda Waxbarashada Maine waxay bixisaa [tabobarro iyo aqoonkorodhsiyo](#) si looga caawiyo dugsiyada inay soosaaraan xeelado iyo kordhinta wacyiga ku aaddan faa'idooyinka in dugsiga joogto loo tago.